

- 1 Haa. Maya. Ma Aqaanno. Maan fahmin.
- 2 Waa maxay magacaagu? Ma ku qori kartaa af ingriisi?
- 3 Min-fadlak qor cinwaanka.
- 4 Imisa jir baad tahay?
- 5 Ma Na siin kartaa magaca iyo tilifoonka ama cinwaanka qof lala soo xidhiidho?
- 6 Dhawaan ayuu ku baadhi doonaa <sup>1</sup>dhaktar. <sup>2</sup>kalkaaliso.
- 7 Ma shil baa kugu dhacay? Goorma? (ku muuji taariikhda iyo saacadda)
- 8 Miyaad miyir beeshay?
- 9 Goorma ayaad xanuunsatay? (ku muuji taariikhda iyo saacadda)
- 10 Miyuu xanuun ku hayaa? Tilmaan meesha. Goormaa xanuunka kuugu horraysay? (ku muuji taariikhda iyo saacadda)
- 11 Intee ayuu le'egyahay xanuunka ku hayaa? 1 (xanuun ma jiro) 2 3 4 5 6 7 8 9 10 (xanuun daran)
- 12 Xanuunku, Ma isdaba-joog baa? Mise marmar ayuu ku qabtaa?
- 13 Miyuu dhiig kaa yimi? Tilmaan meesha.
- 14 Miyaad qufacdaa? Miyay qufaca wax soo raacaan?  
Wax midabkee ah? caddaan? hurdi-cagaar? casaan? bunni?
- 15 Miyay neeftu ku qabataa?
- 16 Miyaad matagtay? Miyaad dhiig matagtay?
- 17 Miyuu shuban ku hayaa?
- 18 Miyay calooshu ku taagantahay?
- 19 Miyaad dhigtay saxaro madaw?
- 20 Boqnuhu miyay ku bararaan?
- 21 Miyaaad caatowday ama dhuubatay?
- 22 Miyay dhibaato kaa haysataa <sup>1</sup>aragtida? <sup>2</sup>maqalka? <sup>3</sup>wax liqida? <sup>4</sup>socodka?
- 23 Miyaa marna lagu qalay? Tilmaan meesha.
- 24 Goorma ayey caadadii u dambaysay ee kaa timi bilaabantay? (ku muuji taariikhda)  
Miyaad uur leedahay? Uurkaagu waa imisa bilood?  
Miyaalaga yaabaa inaad uur leedahay? Ma kuu samayn karnaa tijaabada uurka?
- 25 Miyaad sigaarka cabtaa? Imisa midh ayaad maalintii cabtaa?
- 26 Miyaad leedahay <sup>1</sup>kaadi macaan ama sonkorow? <sup>2</sup>suuxdin? <sup>3</sup>xiiq?
- 27 Miyaad marna yeelatay <sup>1</sup>dhibaatooyin wadnaha ah? <sup>2</sup>laab xanuun? <sup>3</sup>dhiig kar?  
<sup>4</sup>wadnegariir? <sup>5</sup>faalig? <sup>6</sup>cagaarshow (joonis)? <sup>7</sup>beer xanuun?
- 28 Miyaad wax dawoah elleerjik ku tahay? Baynasallin? Asbiriin? Ama dawo kale?
- 29 Miyaad wax dawa ah imika qadataa? Miyaad qaar ka mid ah sidataa?  
Miyaad qaadataa dawooyin kale oo sinaaci ah ama dabiici ah?
- 30 Immisa midh oo kiniin ah ayaad qaadatay?
- 31 Ma kuu dhammytiranyihiin tallaalladii tetanus?

- 32 Miyaad dhawaan tagtay waddan aan ahayn UK? Waddankeey ayaad tagtay? Goorma?
- 33 Waxaan ahay: <sup>1</sup>kalkaaliso. <sup>2</sup>dhakhtar. <sup>3</sup>shaqaalaha gargaarka degdegga ah. <sup>4</sup>shaqaalaha gurmadka (paramedic).  
<sup>5</sup>adeege bulsho.
- 34 Ma ku baadhi karaa? Miyaad wax ka qabtaa hadduu ku baadho <sup>1</sup>nin? <sup>2</sup>haweenay?
- 35 Raalli ahow waxa laga yaabaa inay xanuun leedahay?
- 36 Waxaan u baahanahay inaan cabirno dhiigaaga.
- 37 Waxaan u baahanahay inaan laabtaada dhegaysto.
- 38 Waxaan u baahanahay inaan wadnahaaga baadho.
- 39 Waxaan u baahanahay inaan sameeyo bidhaantaada gudaha ah.
- 40 Waxaan u baahanahay inaan ku mudo.
- 41 Waxaan u baahanahay inaan tiyuubkan kugu eego.
- 42 Waxaan u baahanahay inaan dhiig kaa qaado.
- 43 Waxaan u baahanahay inaan sawir ama khashaafad kaa qaado.
- 44 Waxaan u baahanahay inaan ku tolo.  
Si uu tolmaaha kaaga saaro waa inaad dhakhtarkaaga u tagtaa maalintan (ku muuji taariikhda iyo saacadda)
- 45 Waxa ku jaban/dillaacsan: <sup>1</sup>lug. <sup>2</sup>boqon. <sup>3</sup>gacan. <sup>4</sup>dhudhun. <sup>5</sup>garab.
- 46 Waxaad u baahantahay in balaastar lagu xidho: <sup>1</sup>lugtaada. <sup>2</sup>boqontaada. <sup>3</sup>gacantaada. <sup>4</sup>dhudhunkaaga.
- 47 Waa inuu kugu xidhnaadaa (tilmaan) illaa taariikhda ah (ku muuji taariikhda).
- 48 Min-fadlak ku kaadi weelkan.
- 49 Waxna ha cunin waxna ha cabin.
- 50 Waad kici kartaa iminka.
- 51 Waxaad u baahantahay in cisbitaalka lagu dhigo.  
Min-fadlak sug inta waadhka sariir lagaaga helayo.
- 52 Wax waliba way hagaagi doonaan. Ha warwarin.
- 53 Tagsi ma kuugu yeedhaa?
- 54 Kan isticmaal haddii aad caawimo u baahato.
- 55 Min-fadlak sug. Min-fadlak halkan soo mar. Waad iska hoyan kartaa.
- 56 Min-fadlak soo noqo haddii dhibaatooyin kale kugu soo kordhaan.
- 57 Aan intaa mar labaad kuugu celiyo...

### Su'aalaha ay dadka bukaa waydiiyaan

- 58 Muddo intee ah ayaan sugi doonaa? illaa 1 saacad illaa 2 saacadood illaa 3 saacadood illaa 4 saacadood
- 59 Ma cidbaa magacayga iigu yeedhi doonta?
- 60 Halkuu telefoonku ku yaal, waxaan u baahanahay inaan la hadlo qoyskaygii/saaxiibkay?
- 61 Min-fadlak ma iigu yeedhi kartaa tagsi aan gurigaygii ku tago?
- 62 Saw ma bogsan doono?